Degmooyinka waxaa ka jira hawlaha nololmaalmeedka caadiga ah ee dadka finishka ah iyo mustaqbalka Finland. Shaqooyinka ugu muhiimsan ee degmooyinka waa in ay xaqiijiyaan, in degmooyinka ay ka jiraan fursado ganacsi, shaqooyin ku filan, iyo tayada waxbarashada oo heer sare ah, si loo siiyo fursado mustaqbalka, iyadoon loo eegin meesha lagu dhalanaayo ee Finland.

Waxbarashada iyo niyadsamaanta nololeed ee bulshada ka sokow, degmooyinka waa inay awoodaan inay ka jawaabaan su'aalaha waaweyn ee xilligeennaan taagan: sida aan wax uga qaban karno xaqiijitna daryeelka, madaxbannaanida tamarta, la dagaallanka isbeddelka cimillada, joojinta luminta dabeecadda, iyo hubinta nolol ammaan iyo caafimaad leh.

Marka dhaqaaluhu kordho, mustaqbalku wuu iftiimayaa

Qaabka ugu wanaagsan ee lagu xaqiijin karo, in degmadu ay wanaagsan tahay waa , adeegyada shaqaynaaya, iyo mustaqbalka iftiimaaya~~taasoo ah~~, in degmooyinka ay ka jiraan shirkado iyo fursado shaqo. Degmooyinka waxay dhisaan awood nololeed iyadoo laga faa'iideysanaayo xoogahooda gaarka ah.

Degmada waa in ay ka taxaddartaa maamul mas'uuliyad dhaqaale leh, sidoo kale waa in la tixggeliyaa boorsada jeebka ee dadka degmada. Sababtaas awgeed, waxaan ka soo horjeednaa kororka cashuuraha degmada, cashuuraha hantida, iyo khidmadda ama kharash bixinta. Canshuuraha waa in la dhimaa mar kasta oo ay dhaqaale ahaan suurtaggal tahay.

Haddii ganacsaduhu guuleysto, dhammaanteen waan guuleysaneynnaa

Muhiimadda shirkaduhu u leeyihiin degmada carrabka laguma adkayn karo ama laguma sii xeeldheeraan karo. Xisbiga Kokoomus waa xisbiga ugu taageerada badan ee ganacsatada Finland. Degmadu waa in ay samayso wax kasta oo ay awooddo, si ay ugu fududaato in ganacsatadu ay ka hawlgalaan oo ay sii joogaan degaanka. Habraaca oggolaanshaha waa in uu noqdo mid hufan oo dhakhso ah. Degmooyinku waa in ay sameeyaan nidaam cad oo dammaanad qaadaaya falanqaynta habraaca oggolaanshaha. Degmooyinku waa inay bixiyaan adeegyada oggolaanshaha iyo talosiinta shirkadaha iyadoo la raacayo mabda'a ah "hal albaab," taas oo macnaheedu yahay in dhammaan adeegyada laga helo hal meel oo keliya.

Adeegyada shaqada iyo ganacsiga waxaa ay mas'uuliyaddooda ku wareegeysaa degmooyinka, marka sannadka cusub bilowdo. Degmooyinka, shirkadaha deegaanka iyo waxbarashada xirfadaha, waa inay si wadajir ah u hubiyaan in baahiyaha shaqaale ee shirkadaha iyo adeegyada kala duwan ee shaqo helista ay is waafaqayaan, si loo hubiyo in inta ugu badan ee dadka ay helaan shaqo.

Mustaqbalka Finland wuxuu kordhinayaa iskuullada

Waxaan rabnaa inaan hubinno in aqoonta ama cilmiga ay u diyaar tahay qof kasta, iyo in tayada waxbarashada ee laga bilaabo xannaanada carruurta illaa heerka labaad ee waxbarashada, ay tahay mid wanaagsan oo laga helo dhammaan degmooyinka.

Xannaanada ama barbaarinta carruurtu waa in ay noqotaa mid tayo leh. Hadafka muddada dheer ee xisbiga Kokoomus waa in la ballaariyo waxbarashada hore (esiopetus) illaa laba sano, iyo in dhammaan carruurta la geeyo xannaanada carruurta ugu dambeyn marka ay gaaraan saddex sano. Goobaha xannaanada carruurta ee gaarka ah ama baraayfadka ah, waxaa lagu siin doonaa kubboonka ama jeegga degmadu bixiso ee adeegyada bulshada shirkado looga iibsan karo (palveluseteli).

Waxbarashada aasaasiga ah waa in ay noqoto mid ammaan leh oo caafimaad qabta, lamana oggolaanaayo in halkaas ay ka jirto wax qashqashaad ah (kiusaaminen). Macallimintu waa in ay wax ka qabtaan habdhaqanka dhibaataynta leh. Tirada ay kooxuhu ka kooban yihiin waa in ay ahaadaan kuwo habboon, waana in uu caawimaad helaa qof kasta oo arrinkaas u baahan. Iskuulka waa inuu hubiyaa in ardaydu ka soo baxaan aqoonta wax akhriska iyo wax qorista ee ku filan.

Dugsiga sare iyo waxbarashada xirfadeed waa inay siiyaan dhammaan ardayda, awoodaha ay ugu baahan yihiin inay ku guuleystaan nolosha mustaqbalka. Gudiga daryeelka ardayda waa inuu awoodaa taagerada nololwanaagga ardayda. Waxbarashada xirfadeed waa in la hubiyaa, arrimaha ay ka midka yihiin, in dhex ku joojinta waxbarashada la dhimo iyo in waxbarashadu ay ugu horraynta noqoto mid ah waxbarashada fasalka lagu dhiganaayo.

Degmo ammaan ah

Degaanka gurigu waa in uu ahaadaa mid si ammaan ah loogu noolaan karo, islamarkaana loogu dhex socon karo. Waa in laga taxaddaraa iftiinka waddooyinka, ammaanka gaadiidka iyo ammaanta munaasabadaha. Marka dadka da'da ah ay sii kordhaan, waa in si gaar ah loo daryeelo helitaanka degaanno ama hoy aan xannibaad lahayn, islamarkaana ammaan u ah dadka waawayn. Degmooyinku waa inay ka taxaddaraan arrinka ah u diyaargarowga iyo awooddooda ah inay ilaashadaan kaabayaasha muhiimka ah ee xilliyada dhibaatadu ay jirto.

Magaalooyinku waa in ay fiiro gaar ah u yeeshaan, sidii loo xasilin lahaa goobaha rabshaduhu ay ka jiraan, iyadoo la adegsanaayo shirkadaha, kaamerada ilaalada, booliska iyo joogitaanka waardiyayaasha. Degaannada waa in loo qorsheeyaa qaab ah, in aanay soo bixin degaanno rabshado ama xasilooni la'aan ah. Ma oggolaanaynno in kooxaha dhallinyarada ah ay sii kordhaan. Mas'uuliyadda degmada waa in si gaar ah looga hortago kooxaysiga dhallinyarada.

Dhaqanka iyo jimicsiga waxay abuuraan nolol maalmeed wanaagsan

Degmadu waa inay bixisaa fursado dhaqdhaqaaq, hiwaayad iyo ku raaxaysiga dhaqanka, iyadoo aan loo eegeynin in qofku yahay carruur, dhallinyaro, qoys leh ama da' ah. Jimicsiga maalinlaha ah waa in uu noqdaa mid fudud oo aan dhib lahayn. Ururrada hiwaayadaha waa muhiim, waana in urruradu ay helaan fursad ay ku isticmaali karaan goobaha degmooyinka.

Ilmo walbaa iyo qof kasta oo dhallinyaro ah, waa inuu helaa fursadda ah, in uu helo ugu yaraan hal hiwaayad oo isaga ku habboon. Degmadu waa in ay dhegeystaa codka dhallinyarada, waxaana la horumarinayaa saameynta shaqada dhallinyarada iyadoo lala kaashanayo ururrada iyo kaniisadaha.

Degmadu waa in ay suurtaggalisaa sidii ay u soo saari lahayd arrimaha dhaqanka, iyo sidoo kale waxqabadyo ikhtiyaari ah. Qabanqaabiyayaasha dhaqanka ee deegaanka waa in ay helaan fursad ay kaga muuqan karaan waddooyinka iyo goobaha degmadu ay leedahay. Waxaan doonaynnaa in maktabadaha ay noqdaan kuwo uu qof walbaa heli karo.

Degmooyinku waa inay si gaar ah u tixgeliyaan adeegyada dadka da'da ah iyo qorsheynta saaxiibtinimo ee dadka waaweyn. Adeegyo tayo leh oo la helo wakhtiga firaaqaha ah, waxaa ay ka hortagayaan baahida loo qabo adeegyada caafimaadka. Dadka aan isticmaalin qalabka dhijitaalka ah, waa in ay heli karaan adeegyada iyo macluumaadka. Degmada iyo aaggeeda nololwanaagga waa in ay ka wada shaqeeyaan, sidii loo horumarin lahaa caafimaadka iyo nololwanaagga.

Waxaa la dhisi doonaa degmooyin waara, waxaana la daryeeli doonaa dabeecadda ee ku xeeran

Degmooyinku waa inay dhisaan wax soo saar guryo oo kala duwan, si loo daboolo baahiyaha kala duwan. Waxaan taageeraynnaa soo saarista guryaha ee ku saleysan suuqa. Waxaan qaadeynnaa mas'uuliyadda ah xallinta lumista dabeecadda iyo ka hortagga isbedelka cimillada, annagoo diiradda saarayna xalalka waxtarka leh ee ku saleysan suuqa. Waxaan rabnaa in dhismaha lagu xafido kala duwanaanshaha dabeecadda iyo in la ilaaliyo biyo mareennada.

Xisbiga Kokoomus wuxuu aaminsan yahay in dadku ay xaq u leeyihiin inay doortaan gaadiidka ay isticmaalaayaan. Dhaqdhaqaaqu waa inuu noqdaa mid hufan oo ku habboon dhammaan qaabaka kala duwan ee dhaqdhaqaaqa. Waxaan rabnaa inaan horumarinno gaadiidka tareenada ee gobollada, si loo hagaajiyo heerka adeegga, islamarkaana loo yareeyo dikhowga ama qiiqa gaadiidka.